SOOYAALKA & SUUGAANTA ABWAAN MAXAMED JAAMAC ILKA-CASE

Deeq Aadan Diiriye

Arar

Qormadan, waxa aan si kooban uga sheekayn doonnaa sooyaalkii iyo suugaantii Abwaan Maxamed Jaamac Ilka-case. Iyada oo faahfaahsan waxa aad uga bogan doontaa buug aan dhowaan soo saari doono, kaasoo ku saabsan sooyaalka Maansada iyo Masraxa Soomaaliyeed. Inkasta oo aan buuggaas uga falanqoon doono qormooyin aan, sannadihii 1985tii ilaa 1986dii, ka soo aruuriyay Abwaanno ay ka mid ahaayeen Marxuum Xuseen Aw Faarax iyo Marxuum Maxamed Cali Kaariye, oo wixii ay ii sheegeen, ay kolley aniga weli qaan igu tahay, haddana in aan buuggaas kamilo waxaa ii suurto geliyay Abwaan Maxamed Jaamac Ilka-Case. Waxa kale oo xusid mudan in buugga oo magaciisu noqon dooono: "*Hal-abuur: Hordhac iyo Hooris*" uu abwaanku bixiyay.

Akhristow, da' kasta ayaad jiri kartaa, heerkaaga aqoonta suugaanta Soomaaliduna in kasta ayay le'ekaan kartaa, waxa aadse xaq u leedahay in aad is weyddiiso: "Waa kuma Abwaankaan aan sooyaalkiisa iyo suugaantiisa wax ka qoraynno?" Anna jawaab baa igu garoocdaye, waa hagaag. Si kooban haddaan wax uga iraahdo, Abwaanku, waxa uu sameeyay riwaayado farabadan, oo ay ka mid ahayd tii caanka baxday ee la oran jiray: *"Reer Ba'yow Yaa ku leh?"* Riwaayaddaan waxa ku jiray heesaha ay ka midka yihiin: *"Ma ahee Khadraay"* oo ay qaadaan Maxamed Saleebaan iyo Sahra Axmed; *"Ha iga Goosan Caawaad"* oo ay qaadaan Maxamed Nuur Giriig iyo Aamina Feer; iyo *"Hiddo"* oo ay qaadaan Maxamed Nuur Giriig iyo Faadumo Axmed Dhimbil. Waxa kale oo abwaanku sameeyay heeso aad u qarxay, oo ay ka mid yihiin:

1. *Warsan iyo Weersan Ii Soo Weceey*, oo ay qaaddo Aamino Feer
2. *Weheey Waaqlaan u baxayoo,* oo uu qaado Cumar Dhuule
3. *Weheey Waaqlaan u baxayoo,* oo uu qaado Cumar Dhuule

4. *Waan idin Dhaliilay,* oo uu qaado Xasan Aadan Samatar
5. iyo kuwo kale oo badan oo aad qormadan kaga bogan doontid

Sidaa oo kale, Abwaan Maxamed Jaamac Ilkacase, waa ragga farokutiriska ah ee ilaa maanta sameeya heeso leh habdhismeedkii Qaraamiga. Waxa uu Abwaanku inta badan wax ka curiyaa baabab iyo mawduucyo aan hortiis wax laga oran. Si kastaba ha ahaatee waxaa hubaal ahaa in ay muhiim tahay in wax laga qoro sooyaalka iyo suugaanta abwaanka, taas oo aad uga haqab beeli doonto qormada aan halkaan ku soo qaddinnay. Waxaan ka sii afeefanayaa wixii khaladaad ah, in ay xaggayga tahay, oo Abwaanku ka dhowrsan yahay.

A. Sooyaalkii Hore ee Abwaanka

Abwaan Maxamed Jaamac Ilka-case, waxa uu ku dhashay magaalada Berbera, hillaadda 1930kii. Halkaas ayuu ku soo barbaaray ilaa uu kow iyo toban jir ka soo gaaray. Waxa uu magaaladaas ka galay dugsi Quraankii ugu horreeyay. Inkasta, oo abwaanku asal ahaan ka soo jeedo Gobolladda Puntland, oo ay halkaa ehelladiisu aad u deggan yihiin, gaar ahaan gobolka Bari, haddana Awoowgiisii saddexaad ayaa isaga oo dhallin yar isaga soo guuray, oo u soo kicitimay xaggaa iyo dhulka Soomaali Galbeed, oo dad badan u yaqaan Ogaadeenya, haddana la magac baxday Kililka Shanaad ee Ethiopia. Sidaas ayaa abwaanka Awoowgiis labaad ugu dhashay Fayaanbiiro. Isla markaasna, Awoowgiis iyo Aabbihiisna ay ugu dhasheen Xaado, oo u dhow Jigjiga.

Abwaanka Aabbihiis, Jaamac, oo dhallin yar ayaa u soo guuray Hargaysa. Dabadeedna, waxa uu uga soo gudbay, oo saldhigtay, magaalada Berbera. Odaygu waxa uu Berbera ku guursaday gabar ay ilmo-Eeddo yihiin, oo iyana asal ahaan ka soo jeedday Gobollada Puntland, gaar ahaan gobolka Sool. Waxa ay u dhashay 11 carruur ah, oo uu ugu yaraa Abwaan Maxamed Jaamac Ilka-case. Macnaha, waxa ka waaweynaa saddex wiil iyo toddoba gabdhood.

Taariikhdu markii ay ahayd 1941-dii, oo ahayd xilli uu Dagaalkii Labaad ee Adduunku (World War II) saamayn ku yeeshay Geeska Afrika, ayaa qoyska abwaanka iyo qoysas kale oo farabadan, waxa Ingiriisku qoxooti ahaan ugu soo raray magaalada Cadan, ee

waddanka Yemen. Abwaanka iyo qoyskiisu waxa ay Cadan degganaayeen ilaa afar sannadood. Waxa ay ahayd nolol adag oo qaxootinnimo. Afartaas sano, waxa abwaanka u suuragashay in uu sii wato waxbarashadiisii Quraanka. Markii uu Dagaalkii Labaad ee Adduunka uu dhammaaday ayaa Reerkii oo dhan dib ugu soo noqdeen Berbera. Xilligan abwaanku waxa uu ahaa Qaangaar, 15 jir. Laakiin, odaygii aabbihiis ahaa da' buu noqday, oo waa indho-beelay, isla markaasna aad buu u xanuunsaday.

Waxaa Mas'uuliyaddii reerkuna ku soo furatay hooyadiis. Waxa lama huraan noqotay in abwaanku uu, sida walaalihiis, shaqo raadsado, si uu nolol-maalmeedka reerka wax uga soo saaro. Shaqooyin naf leh waagaas ma jirin. Waxa uu shaqooyin yar yar ka helay makhaayadaha. Mushaarka uu ku bilaabay waxa uu ahaa afar booladood maalinkiiba. Lacag yar bay ahayd, laakiin marka lagu daro lacagaha kale ee walaalihiis soo shaqayn jireen wax weyn bay ku biirin jirtay nolosha reerka. Muddo saddex sannadood ah ayuu noloshaas ku jiray oo uusan Berbera dhanna u dhaafin. Waana xilligaas marka uu abwaanku dareemay xiisaha uu suugaanta u hayo, isla-markaasna uu ogaaday in uu halabuur leeyahay.

Waxa xusid mudan, waa sida aan abwaanka ka dhegadhegeeyaye, in meheradda gabdhaha yaryari ay ahayd falkinta cawska. Xilliga gabdhuhu cawska ka shaqaynayaan waxa ay qaadi jireen *Heesta Cawska*. Wiilasha la da'da ahina waxa ay madadaalo ahaan u aadi jireen meelaha gabdhuhu cawska ku samaynayaan. Wiilashu waa caawin jireen gabdhaha, isla-markaana waxa ay la xareedin jireen heesaha Cawska. Heesahaan, marmar hawsha ayaa la isku illowsiin jiray, marmarna waa lagu kaftami jiray, oo la isku shukaansan jiray. Meerisyada heesahaan waxa ka mid ahaa:

Cawskanow sabool diidow
Yaan suuqa lagu dhigin
Soddon lagugu baayicin
Yaa sameeyay lagu oran!

Fiicanay Farsamadeennuna
May fool adkaan jirin
Ma adigaan fayoobayn
Maanigaan ku foorarin
Mise cawskiibaa fiday!

Abwaan Maxamed Jaamac Ilka-case waxa uu noo xaqiijiyay in yaraantiisii, xilliyada firaaqada uu yahay, uu aad u xiisayn jiray heesahaan iyo ku maararowgooda. Waxa kale, oo abwaanku ii xaqiijiyay, in gabdhuhu ay lahaayeen hees-hawleedyo u gaar ah, oo aan wiilashu ka qaybqaadan jirin. Waxa ka mid ahayd *Heesta Kebadda*, oo aan tixaheeda ka soo qaadan karno:

Birimbirshaaleeyeey bunshareerrey
Ma maantaan bahday helay!

Waa toddobadiiyoo tegiba meynee
Haddaan timir cad nala siin!

Koronkor cunimeynnoo karinba maynnee
Karuur geel ma la hayaa?

Ha yeeshee mar aan abwaanka weyddiiyay tixdii ugu horreysay ee uu curiyo, waxa uu ii sheegay:

"Aniga iyo dhalinyaro aanu saaxiibbo nahay ayaa qaadka qarqarsan jiray. Waxa aannu ku qayili jirnay hadba meel noo qarsoon, oo xitaa aan shaaha ku karsanno qasacado. Inta badan waalidka ayaa na doondooni jiray. Mar walbana waannu aag beddelan jirnay, si aan naloo soo helin. Beri dambe ayaa hooyaday noogu timid gole aannu ku qayilaynay. Canaan bay noola istaagtay. Anna aad baan u qajilay, dhallinyaradiina cabsi baa isugu timid. Mar qura baa tixdaan iga soo boodday":

Cantarba aabbihii ma caasiyin
Cabiid buu uga dhigay quruun Caraba
Camira giddigiin sir iyo caad
Canaan waalid ceeb ma leedahay!

Waxa abwaanku ii qiray in xilligaas, oo uu ku qiyaasay 1948dii, in heesaha *Qaraamigu* jireen, oo ay weliba ku maararoobi jireen. Si kastaba ha ahaatee, isla sannadkaas, 1948dii, ayaa Abwaan Maxamed Jaamac Ilka-case waxa uu ku laabtay Cadan. Waxa uu markiiba bilaabay in uu aad u shaqeeyo, si uu reerkiisa ugu soo diro lacago ay ku noolaadaan. Abwaan Maxamed Jaamac Ilka-case muddadaas uu ku mashquulsanaa caawinaadda reerkiisa, waxa uusan ka tagganayn xiisaha iyo jacaylka uu u hayo

suugaanta. 1956dii ayaa abwaanku waxa uu soo bandhigay Riwaayaddiisii ugu horreysay, oo uu ugu magacdaray Taamilo.

Waxa xusid mudan in, marka *Masraxa Benaaddiriga* laga reebo, Riwaayaddii ugu horreysay ee laga dhigay Soomaaliya, ay soo baxday sannadkii 1954tii. Waxa riwaayaddaas allifay Abwaan Xuseen Aw Faarax, oo ku soo bandhigay magaalada Hargaysa. Riwaayadaha, ilaa 1956dii laga dhigay Soomaaliyana kama badnayn 6, oo uu kulligood allifay Abwaan Xuseen Aw Faarax. Waxa kale oo xusid mudan in aysan riwaayadahaas, laga dhigayay Soomaaliya, innaba wax saamayn ah ku lahayn Masraxa Cadmeed.

Waxa uu Abwaan Ilka-case ii xaqiijiyay in markii uu allifayay uusan isaga riyoon in uu wax *Riwaayad* la yiraahdo sameeyo. Balse, muddadii uu Cadan joogay uu daawan jiray Riwaayadaha Carabta iyo Aflaamta Hindiga. Dabadeedna, afkaartii uu halkaa ka helay ayaa ku dhalisay in uu sameeyo Riwaayad Soomaaliyeed, isaga oo weliba u qabay in aan hortiis cidna isku dayin. Si kastaba ha ahaatee, aan u soo noqonno ka sheekeynta Riwaayaddii ugu horreysay ee Abwaanku Curiyo:

I. Taamilo

Taamilo waxa ay ku saabsanayd arrin qallafsan oo la xiriirta dhaqanka Soomaalida, taas oo ahayd in labada qof ee ilmo-adeerta ah aysan is guursan karin, laakiin labada ilma-abtiga ah ay isguursan karaan. Si taas looga digo, oo su'aal looga keeno, ayaa abwaanku waxa uu sheekada riwaayaddaan ku sawirayaa sheeko xiiso leh oo muujinaysa sida arrintaasi aysan macquul u ahayn.

Arbaha iyo Qalanjada riwaayadda oo ku matalaya ilma adeer, ayaa is jeclaanaya. Arbaha waxa la oran jiray *Durraan*. Waxa uu ku jilayay magaca ah *Caaddil*. Qalanjada waxa matatlayay nin la oran jiray *Caynab* Muuse, waxa uu ku jilayay magaca ah *Canab*. Waxa riwaayaddu ku bilaabanaysaa Arbaha iyo Qalanjada, oo jacaylkooda dhisaya. Jacaylkoodu waa uu xoogaysanayaa, oo weliba xididdaysanayaa, oo tusaale ahaan, muuqaallada ay jacaylkooda ku muujinayaan, mid ka mid ah, ayay ku qaadayaan hees miraheeda, ay ka mid ahaayeen:

Arbaha:

Quruxyahay socotaa adaygu qabtaye

Qaraamkaagi baa i kala qubay
Waanigaa u qalalan sidii qori
Qosolkaad aragtaye, jirkay qalalan

Qalanjada:

Haddaannu qosolkanu qaraaxad ahayn
Qabuul adag aynu kala qoronno
Qisadii Layliyo aan Qays matalnee
Qalqaalaye yay qabyo u dhuran.

Arbaha riwaayadda oo kalsooni buuxda ku qaba naftiisa iyo jacaylkiisa ayaa odayga adeerkiis ah, ee soo korsaday, waxa uu weyddiisanayaa in uu u dhiso gabadhiisa *Canab*, oo ah isaga ina adeertiis. Odayga waxa jilayay nin markaas loo yaqaannay *Cumar Murriyad*, waxa uuse ku dhigayay magaca ah *Geeddi*. Oday *Geeddi* baa waxa uu isku dayayaa in uu ka dhaadhiciyo in *Canab* iyo isagu ay walaalo yihiin, oo aysan is gayin. Inankii taas ma garawsan, oo waxa uu si macquul ah u damcayaa in uu odayga uga dhaadhiciyo in isaga iyo gabadhiisu diin ahaanna is gayaan, in muddo ahna ay hoosta iska jeclaayeen, haddana ay xaq u leeyihiin in ay is guursadaan. Oday *Geeddi* arrintaas waa ka xanaaqay. Waxase uu inanka ku leeyahay bal gabadha ayaan arrintaas ka soo hubsanayaa ee iga war dhowr.

Oday *Geeddi* gabadhii buu caradii kula dhacayaa, waxuuna ku dirqinayaa in ay inanka ina adeerkeed ah diiddo, xaalad uusan gayin awgeed, haddii kale uu dayrinayo. Oday *Geeddi* baa markaas muuqaal ka mid ah riwaayadda waxa uu ku kulansiinayaa *Arbaha* iyo *Qalanjada*, si uu *Arbaha* ugu qanciyo in aan *Qalanajadu* rabin. *Arbaha* oo ogaa sida ay *Qalanjada* isku jeclaayeen ayaa si kalsooni leh u oranaya:

Dhulkii baa roob ka da'ay oo rays qoyana
Rafiiq baan noqon is raacaaya
Hadday raxmad leedoo i raalliday
Ragyohow Canab hayga reebina!

Qalanjada oo ka baqaysa aabbaheed iyo in uu dayriyo baa markaas oranaysa:

Roobkaa da'ay kuuma roonayn
Ku riiq anna kula rakaabsaday
Riyaad ku jirtaa is raajici

Wixii runa hadal ka soo raac.

Odaygii oo arrintaan hore u qalqaaliyay, haddana raalli ka noqday sida gabadhu taladiisii u qaadatay, ayaa waxa uu inankii ku afjigayaa:

Inanyahaw waad igu raagtoo
Adigaan ku rabaa baad
Caawoo dhan noo rogrogaysay
Ma ribaa inantu miyaan reero korsan.

Inankii sidii buu isaga oo yaabban isaga baxayaa. Oday Geeddina markiiba si jajuub ah baa waxa uu Canab ugu meherinayaa wiil walaashiis dhashay oo uu abti u yahay. Arbaha oo warmoog ah, oo weli rajo ka qaba Qalanjada, ayaa waxaa uu si kedis ah u imaanayaa xafladdii Canab iyo ina-abtigeed la isugu meherinayay. Markaasuu waxa uu leeyahay:

Qaniinyo mas waa qaraari nafta
Quddhii bugta waa qulaami beryo
Qardiyo socod waa qajeelo naso
Qoonteeduna dhaymo qaanso leh
Qaraamka caashaqaanu qiil u bixin
Nimuu qotonsaday ma qaalo tirto
Ee Qaaligii dahabkeen qolraag noqonayn
Qareenkii hadimo ah ma qoondaysan
Qiraalsaday inaad qof kale u dhaxday
Qayrkay haatan qoys ag furi maayo
Ee qulууludhacayga qayb farax!

Dabadeedna Arbuhu dhulka ayuu ku dhacayaa, oo laga qaadayaa. Si kastaba ha ahaatee, Canab ninkii loo jujuubay waa uu ku xumaaday. Oday Geeddi, oo aaminay wiilkii uu abtiga uu ahaana, xoolihii baa dhaafay. Markii uu reerkii sabool noqday, ayaa Canab oo la soo furay, waxa ay u soo noqonaysaa Arbaha, oo markaa Ilaahay u nimceeyay. Waxa ay ka codsanaysaa in uu guursado. Ha yeeshee, Arbuhu, isaga oo aarsi ka wada, ayaa uu ku jeesjeesayaa. Waa la isku garnaqsanayaa, waxaana la is dhaafsanayaa, tixo ay ka mid ahaayeen:

Qalanjada:

Miyaynaan ahayn ilma adeer?

Arbaha:

Miyaanad ogayn intii hore?

Aakhirka waa uu cafinayaa, isla markaana waa oggolanayaa in uu guursado. Iyaga oo ay meel fiican u marayso, ayaa waxa albaabka ku soo garaacaya Oday Geeddi oo dawarsanaya. Oday Geeddi, oo aan garanayn cidda uu tuugsanayo, ayaa, markii albaabka laga furo, waxaa uu meerinayaa tixdii uu ku dawarsan jiray, oo ahayd:

Dunidu waa iska sidaase
Anigoo dahab buuxa
Buu I dalaafshay Ibliisku
Dayradii ubadkayga
Dacwad laygu hagaaji
Dadyahaw waad aragtaane
Haddaan daasad sitaaye
Yaa Ilaahay daryeelo!

Canab oo aad uga naxday xaaladda aabbaheed ku sugan yahay ayaa ku soo boodaysa, oo ku dul barooranaysa, iyada oo oranaysa:

"Alla waa Aabbahay!" "Hmmm! Enhhh! Allah! Alla waa Aabahyeey! Hmnmnm! Ehnhheemmm!"

Arbihii, oo garnaqsanaya, ayaa oranaya:

Geeddiyaw tabaalaha ninbaa, goorta lala maago
Guuyadiisa oo nool caanahaa, gow ka joogsada'e
Geel iyo riyaba maalin baa, laga gantoobaaye
Gudboonaanta xaajadaa eg buu, gabay ka tuuraaye
Gabadhaa ina adeertaya ee, joogta garabkayga
Guudkoo u daban Canab markay, gama'a ii diidday
Aan galangaluu Caashaqii, goday arwaaxayga
Guurkeeda waa taad lahayd, maadigaa gayo'e
Aad guriga iga waaliseen, goonidaw kacaye
Gankaagoo siddeetana adoo, guudku ku caddaaday
Garaacidda albaabada dadkiyo, hor Alle yaa gaystay?
Guuldarrada ku haysaaba waa, galabsigaagiiye!

Marka uu Arbuhu tixdaa rito, ayaa la isku garaabayaa, oo la isa saamaxayaa, dabadeedna, aakhirka Riwaayadda ayaa *Arbaha* iyo *Qalanjada* la isku guurinayaa, iyada oo loogu heesayo:

Ilaahaw tu dambiyo kabaalo haro
Tunkiinu waqiiba taagnaado
Waxa tabataanba taabtaan
Tiskaydin hayaa tigaad bixiyo
Tog soo rogay yeesho taariikh

Ilaahaw in la tuuray laysu tabsho
Tafiir yeelata aan kala tegin
Tolkoo xidida tisqaaddaa
Tiskaydin hayaa tigaad bixiyo
Tog soo rogay yeesho taariikh

Ilaahaw taladiinu toosnaato
Tallaaba dhigtaan tusaalaha
Sidii taallo loo tixgeliyaa
Tiska idin hayaa tigaad bixiyo
Tog soo rogay yeesho taariikh!

Waxa aan abwaanka iyo ilo kaleba ka xuuraansaday, in dhaqankii qallafsanaa ee riwaayaddaasi ka digaysay ay dad badani ku waano qaateen. Waxa dhacday in dhallinyaro badan oo ilmo-adeer ah, oo hoosta iska jeclaa, asii ka biqi jiray waalidkood, ay u bareereen in ay is doonaan oo is guursadaan. Sidoo kale, waxa dhacday, in waalidiintii ay dhallinyaradaas u garaabaan, oo ay raalli ka noqdaan guurkooda. Isla-markaasna, la isku dhiso, iyada oo weliba duco loogu darayo.

Waxaa xusid mudan in Riwaayaddaa ay wax ka dhigayeen Aabbaha Muusikada Soomaaliya Axmed Ismaaciil Xuseen, oo ku magacdheer *Xudeydi*. Xudeydi muusikadana waa u tumayay, isla markaasna ilaa laba door oo jilid ah buu ka qaatay. Waxa kale oo xusid mudan in ay lahayd ilaa 200 oo odayaal ah, oo jansuuro ahaan, iyagu go'aamiyay in riwaayaddaan istaahisho in la dhigo, oo weliba lagu daawado qiimo saddex shilin ah. Isku soo duuduub riwaayaddaan aad iyo aad baa Soomaalida Reer Cadmeed u jeclaysteen, oo looga daba dhacay.

Taasi, waxa ay abwaanka iyo kooxdiisii u suurogelisay in uu bishiiba soo saaro riwaayad cusub. Riwaayad kasta waxa ay soo

mari jirtay, oo oggolaansho loo weyddiin jiray odayashaas labada boqol gaarayay. Waxa riwaayadahaas ka mid ahaa:

1. Waa Labadeenna iyo Lixdanka
2. Dawladi Dul Leh
3. Nabsi iyo Naqsi
4. Dhiirradaa Dhacsada
5. Damac
6. Iyo kuwo kale

Bal hadde, riwaayadahaan, oo lahaa qaab masrixiyeed u dhigma riwaayadaha caanka ka noqday Soomaaliya, aynu qaar ka mid ah tusaalayaal ka soo qaadanno:

II. Dawladi Dul leh

Waxa ay riwaayaddaan ku saabsan tahay is afgaranwaa ka dhexdheshay nimankii gobonimada Soomaaliya wax ka dhaliyay, ee qabtay hoggaankii ugu horreeyay, iyo dhallinyaro dibadaha wax ku soo baratay, oo quursanaysay hab-dhaqan dhaqaalaha odayaashu wax ku wadaan. Dhallinyaradaa qurbaha ka timid, ayaa waxa ay aad u quursanayaan habka dadku u dhaqmayay iyo sida wax loo maamulayayba. Iyagana waxa loo arkayaa niman soo gaaloobay ama gaalo iska yeel-yeel ah.

Tixaha riwaayadda baa waxaa ka mid ahaa, mar nin ka mid ah dhallinyarada wax soo baratay, oo ahaa arbaha riwaayadda, uu oday adeerkiis ah, oo soo korsaday, oo matalayay ragga hoggaanka u haya dawladda, ku dhaliilay in ay isaga habsadeen maamul iyo hawlo aysan aqoontooda lahayn. Odaygii oo is difaacayaana waxa uu yiri:

War ninkii taagay ee tuskaba dhigay
Maantuu turqan yahay ninkii wax taraa
Ma kala tagganee is tuhun saar
Tagooggaaga caawa haw turin

Mar kale iyada oo isla dulucda kor ku xusan la isku haysto, ayaa Arbaha iyo Odayga adeerkiis ah is dhaafsanayaan tixahaan hoos ku xusan, oo Odaygu u bilaabayo sidan:

Isma oran Abraarow jin baa, kuu alaab tumiye
Isma oran dadkoo ururan baad, aadin meel kale'e

Isma oran ergaa loogu tegi, Iidda maanta ahe
Ninkaagaan iskuullada ku daray, Urubna loo dhoofshay
Ninkaagaan adduunkii u huray, ariyo geeliiba
Isma oran waxaad ka abhisaad, ku arki doontaaye
Ha yeeshee arliga waxa ka dhacay, waan ogsoonahaye
Isticmaarku meeshuu maraa, uur xumaanta lehe
Inan yar iyo odaygiiba waa, kala irdhoobeene
Adiguunna maahee da'daa, aayo laga waaye
Haddii aanan Allaa is keen badaye, adigu diidaynin
Ina maro Abraarow ma jiro, ubad la tuuraayee.

Inankuna waxa uu lee yahay:

Abshir iyo Aroorow dhulkaa, ololinaysaane
Odayaal jidboodaad tihiin waana aragnaaye
Amuuruhuna sidanaad waddaan, may ahaan jirine
Istiqlaalka taladiisu waa, aalad gooniyahe
Af siyaasadeed iyo run baa, lagu adkaadaaye
Aqalaan albaabadu furnayn, aadde guradiiye
Idinkoo oodihiinni sita baad, ababa'layseene
Ninna hadduu Ilbaxo waa inaan lagu afdheeraane.

Aakhirka riwaayadda, afkaartii Arbaha wax weyn baa iska beddelaysa. Markii muddo loo dulqaato, oo waano lagala daalo, ayuu soo rakuucayaa. Waxa u suuro-gelaysa in uu guursado Qalanjada riwaayadda, oo sarbeeb ahaan ka taagnayd Dawladda la isku haysto. Marka la heshiiyo ayaa la is dhaafsanayaa hees tixaheeda gunnaanadka ay ka mid ahaayeen:

Arbaha:

Tumaatiyo toogashaan filayee
Aslaad tafta qaban kumaan talin!

Sidaa oo kale, Qalanjaduna, waxa ay ku soo hoorinaysay:

Adigaa tunka taagay oo is tuhmay
Tastuurta Islaamku waa taas.

Riwaayaddaan aynnu intaa uga harno, oo aan uga gudubno mid kale.

III. Nabsi iyo Naqsi

Riwaayadihii faraha badnaa ee abwaanka waxa ka mid ahaa iwaayaddan uu ugu magacdaray Nabsi iyo Naqsi. Waxa ay ku saabsanayd: Arbaha Riwaayadda, oo ku jilaya magaca *Farxaan*, ayaa waxa uu ahaa nin reer magaal ah, oo ka yimid Qurbaha. Waxa uu la saaxiib ahaa Qalanjada riwaayadda, oo ku jilaysa magaca *Faakhir*. Waxa ay isla ahaayeen reer magaal. Waxa ayna isku jeclaayeen si aad iyo aad ah. F*arxaan* waxa uu gaarayaa miyiga. Markii uu miyiga tago ayaa reerkiisu waxa ay ku qancinayaan in uu iska dego miyiga oo uu guursado gabar ay qaraabo yihiin oo reer miyi ah. Waxa uu isku dayayaa in uu la qabsado noloshaas cusub iyo guurkaas reerkiisu u gartay. *Farxaan* aad bay noloshaasi ugu adkaanaysaa.

La qabsahsahada miyiga, qosolkeeda iyo maaddeeda ayaa ay lahayd. Waa uu isaga soo baxsanayaa. Waxa uu u soo noqonayaa magaaladii. Waxa uu isku dayayaa in uu dib ula qabsado magaaladii. Iyana qosolkeeda iyo maaddeeda ayay lahayd. Waxa uu dib u raajicinayaa *Faakhir*, oo ahayd gabadhii uu saaxiibka la ahaa, ee uu aadka u jeclaa, oo ka war heshay in uu guursaday, isla markaasna ka qanacday. Iyana waa ku laadaysaa. Riwaayaddan Tixaheedii waxa ka mid ahaa middaan, uu odaygu Farxaan ku qancinayo in uu miyiga ku noqdo. Waxa ayna lahayd:

> Farxaanow wax badan baad fadhiday, fookha daarahe
> Aan fiiga kaa bixinayaad qalin, ku foognayde
> Wax dhaaxaan sariir iyo furaash, fiican kuu dhigaye
> Wax dhaaxaan dhar kuu soo fasilay aadan filanayne
> Aan faygamuur lama xidhee, kabaha faylkooda
> Fuudhkaaga dhaaxaan ka helay, Buudhka Faransiise
> Faadumo wax badan bay ku tiri, tiiri feeraha'e
>
> Mar haddaan tacliintaa ku faray, adigu soo foostay
> Oo aad filkaa dhaaftay way faydo iyo khayre
> Nin fariid dhalaa baa sida u fiicanaan jiree
> Farsamadii miyaa ku hartiyo foofka Xoolaha e
> In fanjeedis uun aynu nahay, taniyo fiidcawlka
> Faadumo ogaysii haween, foojigaad ma lehe

Waxa kale oo tixaha Riwaayadda ka mid ahaa middaan uu Farxaan ku calaacalayo kadib markii nolosha miyigu ku adkaatay,

oo uu laabta ku hayay in uu u soo noqdo xaggaa iyo magaalada iyo gabadhii uu jeclaa. Waxa uu yiri:

Fooraha dhacaayaw hal aan ku faro
Waxaad Faakhir oran inankii falaagow
Farxaankaad ogayd ma fiicnayn
Wuu faytaa hadba labada fiid cawl
Fiintiyo galawguu la fooriyaa!

Waxa kale oo tixaha Riwaayadda ka mid ahayd middaan, oo markii Farxaan dib u soo raajiciyo Faakhir ay isku difaacayso. Waxa ay tiri:

Magaaladiyo moodihii ka baxdaye
Ninyahaw reer miyee maryaha cascas lihi
Maqalnay in laguu mashxaradaayay
Marwadaad heshey waa iska maansha Allee
Mabruuk oo laysku kiin macaanee
Muusiyo kuugu curatay Maandeeq
Maartuba dahabkay la midab tahay
Madoobaatay maalmo dabadood
Mid kale isku sii macaanee.

IV. Dhiirradaa Dhacsada

Riwaayaddaan waxa ay ahayd guubaabo ku jeedda gobonimodoon ku jihaysan dhulka Soomaaliyeed ee Itoobiya gumaysato. Waxa la sameeyay 1964tii, waxaana lagu ayidayay dagaalkii Dawladda Soomaalidu ku qaadday Itoobiya. Gaar ahaan hadalkii caanka ahaa ee uu Cabdirashiid Cali Sharmaake, oo goortaas ahaa Wasiirka Koowaad ee Dawladdu, uu ku lahaa:

"Gacanna waan ku dagaallamaynnaa, gacanna codka ayaan ku bixinaynnaa."

Dhanka kale waxa ay dhaliilaysay in aan dadka Soomaaliyeed u taageerayn sidii loo baahnaa walaalahooda ku jira gacanta gumaysiga. Sidoo kale waxa riwaayaddu ay saadalinaysay in haddii aan la xorrayn gobollada maqan in aakhirka xitaa labadaan gobol ee midoobay ay kala tegi doonnaan.

Arbaha riwaayadda ayaa waxa uu shukaansi ugu imaanayaa Qalanjada. Qalanjadu waxa ay aaminsan tahay in raggii iyada

gayi lahaa ay ku maqan yahiin dagaalka gobonimo u dirirka. Iyada oo Arbaha, sina u rabta sina u dhaliilaysa, guubaabana uga dan leh, ayaa waxa ay oranaysaa:

Harqoodaar adaa handuullo ku xidhee
Hawdkaa maqan looma kala harin
Haacow inaad tahay halyeeyo socdee
Haweenka maxaa ku hoos dhigay.

Arbaha ayaa noloshu ku adkaanaysaa. Dhibaatada gumaysiga ayaa soo karaysa. Waxa uu garwaaqsanayaa in haddii qayrkiis gumaysi ku jiro uusan gobonimo haysan. Waxa uuna u adkaysan waayayaa dhaliisha dumarka uga imaanaysa. Markaas ayuu ku calaacalayaa:

Gaajadii baxdaan isku gaballaxshaye
Kasabkay haduu gaasaar ku dhacay
Hurdo aan gam'aa way guuldarro
Waa inaan guntiga isku giijiyaa

Guutadaan lahaa gaarsii dayaxa
Mar hadduu I gabay gaashaanlihii
Hurdo aan gam'aa way guuldarro
Waa inaan guntiga isku giijiyaa

Gobolkii kaleen u gargaar lahaa
Mar hadday gidaar nagu kala gudbeen
Hurdo aan gam'aa way guuldarro
Waa inaan guntiga isku giijiyaa!

Arabaha riwaayaddu marka uu si fiican u garawsado in aan nolol iyo guur toona u suurto galayn, ayaa waxa ay dani bidaysaa in uu soo abaabulo koox dhallinyaro ah oo la jabhadaysa, oo kala qayb qaadata dagaalka gobonimo u dirirka. Waxa ay u imaanayaan Qalanjadii oo iyana hoggaaminaysa koox haween ah, oo halganka gobonimoddoonka wax ka wadday, oo ragga hubka u qaybinaya. Markaa buu inankii ku heesaya:

Waa kaa dhulkii ii dhawaaqayee
Waan dhaqaaqayaa dhakhso iigu dhiib
Xayle ha dhintee dhakhso iigu dhiib.

Dadka kii i dhiba kama dhowrsadee
Dhamadlow amxaar bay soo dhigtaye
Waan dhaqaaqayaa dhakhso iigu dhiib
Xayle ha dhintee dhakhso iigu dhiib.

Dhaaxaan jeclaa inaan calan dhidbo
Caawuu dhabyoo waa kaa dhismee
Isticmaar dhacyoo Xaylaa dhintee
Waan dhaqaaqayaa dhakhso iigu dhiib
Xayle ha dhintee dhakhso iigu dhiib.

Inta heestaan socoto, dumarka oo ragga jabhadda ah, hubka mid mid ugu dhiibaya, ayaa heesta ku hoorinaya:

Hoo wallaale hoo
Waa hubkiiye hoo
Hawd la qaadye hoo
Hoo wallaale hoo!

Waxa riwaayaddu ku dhamaanaysaa iyada oo uu dhulkii xoroobay, dadkuna ku wada heesayaan:

Allahayow xor baanu nahay
Allahayaw xumaan diidday
Allahayaw xarbiga gaalada
Allahayaw ha nagu xirin

Allahayaw ninkii ku xusiyo
Ninka aan ku xaalayn
Xeerkoodi lagu qaado
Allahayaw ha nagu xirin!

Waxa xusid mudan in haddii aad u fiirsato farshaxanka iyo qaab-dhismeedka riwaayadihii uu abwaan Ilka-case ka bilaabay Cadan ay la mid ahaayeen kuwii uu Allaha u naxariistee, Abwaan Xuseen Aw Faarax ka bilaabay Hargaysa. Waxaana cajiib ah in dhammaan riwaayadihii laga dhigay Soomaaliya ay weli leeyihiin farshaxankaas iyo hab-dhismeedkaas kore ee Marxuum Xuseen Aw Faarax iyo Abwaan Maxamed Jaamac Ilka-case ay jidbixiyaha ka ahaayeen.

Xagga silsiladda haddii aad u fiirsato, waxa ay dhammaan leeyihiin celcelis ilaa 20 muuqaal ah. Waxa ayna badi leeyihiin

labo sheeko oo is barbar socda, marmarna meel isaga xirma. Sheekada muhiimka ah waxa jila *Arbaha* iyo *Qalanjada*. Sheekada labaadna, waxa jila *Arbaha labaad* iyo *Qalanjada labaad*. Waxa kale, oo marmar la soo raaciyaa sheeko saddexaad oo majaajillo ah. Waxa khasab ah, in riwaayad walba ay ku jiraan heeso, oo runtii miisaan u ah qiimaynta riwaayadaha Soomaaliyeed. Haah, oo in riwaayadi caanbaxdo iyo in habeenkaa la daawaday lagu illaawo, waxa, inta badan, sabab u ahaa heesaha ku jiray mirahooda iyo laxankooda, iyo weliba codka cidda qaadaysay.

Marka laga yimmaado hab-dhismeedkaa kor lagu sheegay, waa jireen riwaayado faro-ku-tiris ah, sida Riwaayad la oran jiray Aw-Bustaale, iyo riwaayado dhowr ah, oo uu lahaa abwaan Siciid Saalax Axmed, ayaa runtii la yimid qaab masrixiyadeed ku cusub Soomaalida, ha yeeshee falanqaynta arrimahaasi waa ka ballaaran yihiin qormadaan, oo, Insha Allaah, waxa aan uga sheekayn doonnaa buuggii aynu hore u soo sheegnay**.**

B. Soo Noqoshadii Soomaaliya iyo Abwaan Ilka-case

Dabayaaqadii 1967dii, ayaa uu abwaan Maxamed Jaamac Ilka-case isaga soo qaxay Cadan, oo uu u soo ambabaxay Soomaaliya. Keligiis ma ahayn, ee dad fara badan oo Soomaali ah bay ahaayeen. Isaga iyo kow iyo toban saaxiibbadiis ah, oo uu ka mid ahaa Abwaan Maxamed Ibraahim Hadraawi baa wada socday. Xamar iyo xaruntii dalka bay soo beegsadeen, oo ay hal aqal ka wada degeen. Dadkaas qaxootiga ah, ee dagaallada Yemen ka soo cararay, sidii ay filayeen, looguma soo dhoweyn Soomaaliya. Waa tii, heesta Qaraamiga ah lagu lahaa:

> Naagaha xunxun ee is xoodaayiyo
> Xabbadi keentay hay xayaysiin

Si kastaba ha ahaatee, dadku isku wada mid ma aha, oo waxa abwaan Ilkacase iyo saaxibbadiis ka abaal sheegtaan nin la oran jiray Axmaddey Hadaafow, oo si gobonnimo iyo Soomalinnimo leh u soo dhoweeyay, oo u taakuleeyay. Axmaddey Hadaafow waxa uu ahaa nin Ilaahay xoolo siiyay fankana aad u jecel. Waxa uu aruurin jiray fanka iyo fannaaniinta Soomaalida. Marka kowaad, haddii hees waa la qaaday loo baahdo, waxaa laga heli jiray Marxuum Axmaddey Hadaafow, oo waxa uu ahaa nin heesaha duuba oo xafida. Marka labaad, waxa uu ahaa nin qaddariya

fannaaniinta iyo suugaanyahanka kaleba. Haddii Fannaan socdaal ku yimaado magaalooyinka uu ganacsiga ku lahaa sida Xamar iyo Jawhar isaga ayaa ugu hor ogaan jiray, oo qaabili jiray. Deeqsinimada iyo Fanjacaylka Hadaafow, waxa kale, oo ii qiray Cabdulqaadir Yuusuf Cirro, oo ku magacdheer Bagaag. Waxa Bagaag ii sheegay, in isaga oo markaas fanka ku cusub, sannadkuna uu ahaa 1972dii, oo ay u qarxeen ilaa laba heesood oo ay ka mid ahaayeen *Galleyryahaw Adaa Geesiyoon Biqine* iyo *Caynba Cayn Adduunyooy* uu yimid magaalada Jawhar, si uu ugu dhamaysto waxbarashadiisa Dugsiga Sare, oo uu fasalkeeda kowaad ku soo qaatay Gaalkacyo. Wuxuu Bagaag ii sheegay, in inkasta oo heesihiisa markaas ardayda college-ku ay aad u wada yaqaaneen, haddana isaga shakhsiyan iyo heesaha la iskuma aqoon. Isagoo arrintaas iiga warramaya, waxa uu Bagaag yiri:

"*Aniga oo markaa ilaa dhowr maalmood Iskuulka joogay, oo dadka iyo deegaankaba qariib ku ah, oo iska daa magaalada'e, aan xitaa wax saaxiibbo ah markaas ku yeelan Iskuulka, ayaa waxa noogu yimid nin wata Mooto Saddex-dhugdhugley ah, oo naadinaya magacayga oo saddexan. Isaga oo Iskuulka oo dhan ku soo wareegay, ayaan mardambe maqlay isaga oo qaylinaya, oo kor u leh: "War yaa yaqaanno Cabdulqaadir Yuusuf Bagaag. Waxaan ku iri: "War ninkaas waa aniga, ee yaa ii baahan". Ninkii mootada watay, oo neef ka soo kudday, ayaa wuxuu yiri: "Yaakhi soo bax, maantoo dhan aan ku raadinaayay, waxa ku raba Hadaafow" Waxaan iri: Yaa waaye Hadaafow? Ninkii baa ii sheegay in uu i gaynayo Hoteel Hadaafow leeyahay, oo ay joogaan Fannaaniin waaweyn, oo uu ka mid yahay Marxuum Maxamed Mooge. Markii afkiisa ay ka soo dhammaatay magaca Mooge, oo ahaa fannaan aan aad ilaa hadda u qaddariyo, laakiin xilligaas aanan u lahayn aqoon shakhsiyadeed, ayaan si halhaleel ah ugu soo dhacay mootadii. Sidii ayaa waxaa la igu baray Hadaafow iyo Mooge, oo labaduba caawa naga hooseeya, naxariistii janno Ilaaheey ha siiyee, iyo weliba fannaaniin kale oo fara badan, oo isugu jira muusikiiste, mullaxamiin iyo weliba heesaa. Habeenkii cajlado ayaan duubnay, si fiicanna waan u sheekeysanay isuna baranay, oo u raaxaystay. Wixii intaa ka dambeeyay, Hadaafow saaxiibbo ayaan noqonnay, oo hoteelkiisa iyo makhaayaddiisuba sida aan rabo baan u isticmaali jiray, aniga oo aan wax kharash ah la iga rabin. Ilaahaw kuu naxariiso. "*

Sidaa oo kale, waxa uu Abwaan Ilka-case ii sheegay in markii ay yimaadeen Xamar ay wateen lacag yar, oo ay badideedii guri ku kiraysteen. Xoogaagii u soo harayna ay makhaayad xaafadda u dhow wax kaga cuni jireen. Makhaayaddaas ayay isku barteen Axmaddey Hadaafow. Markii lacagtii ka dhammaatay ayaa ay joojiyeen aadidda makhaayaddii. Hadaafow ayaa markii uu maalin iyo laba arki waayay soo raadiyay. Markuu ogaaday in ay lacag la'aan la imaan waayeen makhaayadda, ayaa waxa uu isugu daray lacago deeq ah iyo qaar amaah ah, oo markii dambe gaaray ilaa 5000 oo Shilin Soomaali ah.

Abwaanka iyo kooxdiisu iyaga oo saas u deymeysan baa waxa u suurogashay in ay sameeyaan riwaayaddii caanka baxday ee la oran jiray: *"Reer Ba'yow Yaa ku leh?"* Riwaayaddaan, waxa ku jirey heeso ay ka mid ahayeen: *"Ma ahee Khadraay"* oo ay qaadaan Maxamed Saleebaan iyo Sahra Axmed, *"Hayga Goosan Caawaad"* oo ay qaadaan Maxamed Nuur Giriig iyo Aamina Feer; iyo *"Hiddo"* oo ay qaadaan Maxamed Nuur Giriig iyo Faadumo Axmed Dhimbil. Riwaayaddaas ayaa ay ka heleen dhaqaale badan oo ay ku dayn baxeen. Buugga ayaad kaga bogan doontaan riwaayaddan dhammaanteed, wax uun baanse halakan kaga tataabanaynaa.

V. Reer Ba'yow Yaa ku leh?

Riwaayaddaan waxa ay ku saabsanayd dad weli ku dheggan dhaqankii Soomaalida ee reer miyiga iyo kuwo la yimid dhaqankii Reer Galbeedka oo isugu imaanaya meel magaalo ah. Waxa la isku qabsanayaa *'badaw baad tihiin'* iyo *'gaalo ayaad tihiin.'* Jilayaasha riwaayadda waxa ka mid ahaa

1. Arbaha: Cabdiraxmaan Shiikh Xasan Cabdi
2. Qalanjada: Faadumo Axmed Dhimbil
3. Arbaha 2aad: Maxamed Siciid Bandey
4. Qalanjada 2aad: Asli Khayre Gabboon
5. Maxamed Ibraahim Xadraawi, oo ku matelayay Oday
6. Jaamac Dubbad Xiirey, oo isna Oday ku matelayay.
7. Iyo rag iyo dumar kale, oo farabadan.

Haddii aan muuqaalladii riwaayadda wax ka soo qaadanno waxa ka mid ahaa: Gabar miyiga ka timid, oo markaa magaalada soo gashay baa waxa fuduulinaya gabar kale oo xaggaa iyo Yurub wax ku soo baratay

oo ku soo noqotay magaalada. Gabadha reer miyiga ahi waxa ay ku labisnayd dharkii hiddaha iyo dhaqanka ee lahaa saddex-qaydka, dhaclaha iyo boqorka. Gabadha Yurub ka timidna waxa ay xirnayd suud ah jaakad iyo goonno gaaban. Gabadha reer miyiga ahayd baa waxa ay isku difaacaysaa:

Inantii ku dhow dhaqankiyo hiddaha
Aan laba dhudood waxba dhaafsanayn
Amaan dhar gadan bawdyaha ku dhow
Ee dhowrsataa ma dhibbay qabtaa?
Mase Dhoohanay wey dhego xirnaan?

Muuqaal kale, oo majaajillo looga dan lahaa, asii taabanaya dulucda riwaayadda, ayaa inantaas reer magaalka ah oo joogta meel xafiis ah, waxa u imanaaya laba wiil oo reer miyi ah. Wiilashii baa waxa ay gabadha weyddiinayaan magaceeda. Gabadhii oo aan si fiican u maqal su'aasha la weyddiiyay, ayaa waxa ay u qaadanaysaa in la weyddiiyay magaca xafiiska. Markaasay waxa ay leedahay: "Walaalayaal, meeshaan waa Fiisho Gofeerno *(officio de governo)* ee maxaan idinka caawiyaa?" Inamadii baa waxa ay u qaadanayaan in magaceeda la yiraahdo Gobeerno. Markaasay waxay si jees jees ah ku lee yihiin:

"Naa yaa Gobeerno dad waa Gaaliyo Islaane; Adigu iyamaad gashaa?"

Markasaa gabadhu si caro leh waxa ay u leedahay:

"Waar waad u jeeddaa in aan Soomaali ahaye, maxaad iga weyddiin Muslin iyo Gaal middaan ahay?"

Innamadii baa markaa si maad leh waxa ay lee yihiin:

Gabdhaha Soomaaliyeed
Guntiinay wada sitaane
Garays bay wada xidhaan
Maxaa kugu gaabshay marada?

Inta inantu aad u xanaaqdo ayay luuqaddii talyaani u beddalanaysaa. Markaasay weliba nimankii xafiiska waardiyaha ka ahaa gambaleel ugu yeeraysaa. Markaasaa inamadii meesha laga kaxaynayaa. Muuqaal kale, odayga dhalay gabadha reer

miyiga ah baa isna waxa uu si kedis ah u soo gelayaa meel makhaayad ah oo rag iyo dumar reer magaal ahi wax ku wada cabbayaan. Odaygii baa waxa uu raggii ku oranayaa:

Hadba dunida ruux bow tashoo, taabbo qaad galo'e
Tabaalooyin xooglaa ka dhaca, amaba toosnaane
Togog malaba baysku xiga, kayn tamuux badane
Talantaaligaasay ahayd, tan iyo Haabiile
Kolka qolo la taakulinayeen, laga tisaynaynin
Hadba kii tacliinta u barta baa, tiirshay gacalkiise
Nimankaan tastuurtiyo sharciga, kula tacjiiraayay
Awrkii tabaadina kuwii aan tuulada u keenay
Kuwii odayga timir iibiyaa, tolayay shaarkooda
Ee aan haruub kala tegayn, kuumi iyo taano
Ayaa tiginka Soomaaliyeed, jebiyay tiirkiisa
Teeriyo Hindiya bay dadkii, wada taxaabeene
Talyan iyo Faraans bay galeen, tigimadoodiiye
Tog bay nagu fureen aan ilaa, Yurub istaagaynin
War hoy timir laf baa lagu arkaye, taa hala ogaado

Dabadeed, waxa uu u soo jeesanayaa hablihii oo aan iyana waxba dhaamin, wuxuu oranayaa:

Hablayahaw tabaalada adduun, gelinba waa taa.
Taariikho badan baa wakhtiga, lagu tilmaamaaye
Hadbana wax la toydaa qofkii, kaa tilmaan badane
Taada lama maroorsado adoon, taabbo goys noqone
Cidlana laysma taagee dadkaa laga tixraacaaye
Toos looma filo xaal hadduu, tuuro leeyahaye
Weligiin jar baad nagu tistaan, naguna taartaane
Taakulo in aydnaan lahayn, tacaddi mooyaane
Talaxumadu waa waxaad jannada, nagaga tuurteene
Idinkoo tastuurta iyo sharciga toos u garanaaya
Oo diintu sida ay tiriyo, qiraya tawxiidka
Tafta inaydin wada laalataan, waa tilmaan xumo'e
Hooyooyinkii kuma tarmayn, taydin barateene
Saddexqayd la tolay iyo dhaclihii, laga dul tuuraayay
Kabihii tooska loo dhigi jiree, ciribta loo taagay
Caadooyinkeennii taxnaa, waad ku tumateene
Timaha inaad dabtaan baa ka roon, aalatuumbada'e

Muuqaal kale oo majaajillo ahaa ayaa waxa ku jiray habar caayaysa gabdhaha dhallinta yar ee Reer Magaalka ah. Waxyaabihii ay ku naqdinaysay baa waxa ka mid ahaa tixdaan buraanburka ah.

Intay cuudka rooxaamiyaan unnsi kuma ritaan
Inyaroo Ruuxba Ruuxa bay raqbaddaa marshaan!

Heesihii riwaayaadda ugu caansanaa waxa ka mid ahaa heesta la yiraahdo: *"Maahee Khadraay"* oo uu laxankeeda sameeyay Maxamed Saleebaan. Heestaan in kasta oo codkeeda ay hadda ku caan baxeen Maxamed Nuur Giriig iyo Sahra Axmed, haddana waxa asal ahaan wada qaadayay Cabdiraxmaan Shiikh, oo ku magac dheeraa Aburaas iyo Faadumo Axmed Dhimbil. Cabdiraxmaan waxa uu ahaa arbaha riwaayadda. Faadumana waxa ay ahayd qalanjada riwaayadda. Si kastaba ha ahaatee, waa tan heestii:

Arbaha:

Inan kula qabtoo
Kula qayrahoo
Aan quusanayn
Inaad quursataa
Inaad quursataa
Waa qiil jabee
Maahee Khadraay
Khadraay, Khadraay
Qiimiga kalgacal
Ee quruxda badan
Maad ila qorshayn

Qalanjada:

Labadii qofeen
Isku qurux badnayn
Ee kala qab weyn
Inay wada qabtaan
Inay wada qabtaan
Waa qiil jabee
Inanyahaw qaldani
Qaldani, Qaldani,
Qiimiga kalgacal

La iskuma qasbee
Hubka iga dulqaad

Arbaha:

Waa waxa qab dumar,
Qays iyo Cilmiba,
Qudha uga baxdee.
Anigana Qabriga,
Anigana qabriga
Adigay qodee.
Maahee Khadraay
Khadraay, Khadraay
Qiimiga kalgacal
Ee quruxda badan
Maad ila qorshayn

Qalanjada:

Buuraha qotoma,
ee qarada weyn,
Adigoo qaboow.
Cidi baa kuu qodi
cidi baa kuu qodi,
qawdeysatee.
Inanyahaw qaldani
Qaldani, Qaldani,
Qiimiga kalgacal
La iskuma qasbee
Hubka iga dulqaad

Arbaha:

Sida qaalin nirig
laga qariyay baan
kuu qawdhamaa.
Qorax soo baxdiyo,
qorax soo baxdiyo
Qawl kuu galaa
Maahee Khadraay
Khadraay, Khadraay
Qiimiga kalgacal
Ee quruxda badan
Maad ila qorshayn

Qalanjada:

Wannan lama qashoo
Birta lama qarshee
anigaba qalbiga,
Qoonta igu taal,
qoonta igu taal
Aan kuu qiree.
Inanyahaw qumani
Qumani, Qumani,
Qiimiga kalgacal
Aan qaybsannee
Dhinacaaga qabo

Inta aynaan ka gudbin riwaayaddan, waxa xusid mudan, marka maansada Soomaalida, gaar ahaan heesha, laga fiirsho xagga miisaanka ama habdhiska, in heestaan, *"Maahee Khadraay"* ay tahay Jidbixiye. Buugga ayaad kaga bogan doontaaye, waxa jirtay in heesuhu ay ku soo bilowdeen habdhismeedka gabayga; dabadeedna ay u soo xuubsiibteen habdhismeedka dhaantada; dabadeedna ay u bateen habdhismeedka Jiiftada ama Masafada. Haddaba, heestaan oo leh habdhismeedka heesta Maqasha, waxa ay aabbe iyo hooyo u tahay heeso ama tixo casri ah, oo Toddobaatameeyadii ka kacaamay dalka, kuwaasoo dib u gacantogaaleeyey badihii maansooyinka ee asalka ahaa, sida tan koolkoolinta ubadka, tan geela, tan Rigeeya Rigeeya, tan Saarka, tan batarka, iwm. Waxa Kacaankan hormuud ka ahaa Abwaaniin leh Hadraawi, Siciid Saalax, iyo Gaarriye. Bal waxa aad heestaan ku sii qiyaastaa, heestii asalka ahayd ee Maqasha, oo aan miraheeda ka soo qaadan karno:

Hoobeey hobeey
Hoobeey hobeey
Cuud-cuutiyaay
Cuur hooyadaa
Caanaha ku yaal
Cararoo ka nuug.

Hoobeey hobeey
Hoobeey hobeey
Waa taan cabsida
Kaa celin jiree
Adiguna cidlada

Kac igala carroow!

Hoobeey hobeey
Hoobeey hobeey
Waxaraha gordodan
Waxay gocanayaan
Gaajoonnayee
Geel noo lisaay!
…….

Haddaan ku soo noqonno riwaayaddii aan ku guda jirnay, heesta labaad, ee caanka baxday waxa ay ahayd: *"Hayga Goosan Caawaad".* Heestaan waxa laxankeeda sameeyay Jaamac Saleebaan Tubeec, oo la dhashay Maxamed Saleebaan Tubeec, isla markaasna abwaanka la ahaa Reer Cadmeed, oo weliba wax ka dhigi jiray riwaayadihii Cadan. Inkasta oo qaadista heestaan ay ku caan baxeen Maxamed Saleebaan iyo Aamino Feer, haddana markii ugu horreysay ee riwaayadda la dhigay, waxa qaadayay Arbaha, Cabdiraxmaan Shiikh (Aburaas) iyo Qalanjada, Faadumo Axmed Dhimbil.

Qalnjada (Geeraar ahaan):

Galalaase meeloo
Galowgiyo ugaadhi
Geesaha ka dhaafeen
Aday gogoli kuu taal
Galadayda dhaaxaan
Geed iyo har jiifay
Hayga goosan caawaad
Iga gacan saraysaa

Arbaha(Geeraar ahaan):

Anoo kuu go'aayoo
Garabkaa filaayaad
Axdigeeni goysoo
Geesta iga dhaaftee
Nabsigii gaaxsanaabaa
Gooyaha ku gooyee
Guur ha iga filanine

Gurigaygan ii dhaaf

Qalanjada:

Nabsi ruuxii gaaxshaa
Godobtiisa maalee
Sidan aniga kuu galay
Gafi maysid adiguye
Aargudashadaaduna
Gar ilaahey weeyee
Ha iga goosan caawaad
Iga gacan saraysaa

Arbaha:

Qof kastaa abaalkii
Yahay guul darraantee
Waxan ahay nin gabaryahay
Gacantaada midigtee
Waxan ahay garaax iyo
Godobtaan dugsanayee
Guur hayga filanine
Gurigaygan ii dhaaf

Qalanjada:

Adoo gacal isoo biday
Waataan ku gowrshay
Ku garwaaqsan waayey
Kaa saartay gacantee
Waxan aniga goostaa
Goobtaan i joojee
Ha iga goosan caawaad
Iga gacan sarraysaa

Arbaha:

Waxan ahay nin gacalkii
Awgaa u gooyoo
Waxan ahay gargaarkii
Galadkaaga waayee
Waxan ahay gandood iyo

Gocosho u dambeysee
Guur hayga filanine
Gurigeygan ii dhaaf

Qalanjada:

Gowraha habeenkii
Gudcurkaad istaagtiyo
Garki aad iqabatiyo
Guubaabadaadii
Gardarraan u qaatoo
Kuumaan garaabine
Ha iga goosan caawaad
Iga gacan sarraysaa

Arbaha:

Sidan ahay nin gaaloo
Xarameynkii galayoo
Gubay maalin ciidoo
Lagu soo gurmaday baad
Gabi dheer i saartood
Igu gooni baadhee
Guur hayga filanine,
Guur hayga filanine
Gurigaygan ii dhaaf

Heesta saddexaad ee Caanka baxday waxa ay ahayd *"Hiddo,"* waxa laxankeeda sameeyay Jaamac Saleebaan Tubeec. Waxa qaadisteeda ku caan baxay Maxamed Nuur Giriig iyo Faadumo Axmed Dhimbil. Waxaase markii riwaayadda la dhigayay qaadayay Cabdiraxmaan Shiikh (Aburaas) iyo Faadumo Axmed Dhimbil. Heestaan, sida heesta: "*Ma ahee Khadraay,"* waxa ay leedahay hooris la dhismo ah tan maqasha, oo weliba laba-laba meeris isugu xiran. Haddii aan kuu sii bayaansho waa kuwan hoorisyadu:

Qalanjada:

Halacoow gudoon hadalkaad tidhee
Kuu hagar baxee anigana i hoo

Arbaha:

Taakulo Hiddo ma ii huri kartaa
Haahey kalgacal ma ii hibin kartaa

Meerisyada kale ee heestu, waxa ay la dhismo yihiin Jiiftada, sida heesta kore. Adiga ayaa ka bogan doona'e, waa tan mirihii heestu:

Arbaha:

Nin hablaha dhamaantood
soo wada hilaadshoo
Haasaawe kay tahay
Hungureyn xaggoodoo
Adna kuu hanweeynoo
Waxaan ahay ku heybshee
Ma ii hagar baxdaa?

Qalanjada:

Halacoow gudoon hadalkaad tidhee
Kuu hagar baxee anigana i hoo

Qof harraad u liitaa
Biya kama hagaagee
Hiil geesi waayaa
Hibashada ma daayee
Haankaad wareentaa
Hurgumooday caawee
Ma is heli karnaa

Arbaha:

Taakulo Hiddo ma ii huri kartaa
Haaheey kalgacal ma ii hibin kartaa

Hoorriga la sheegiyo
Hanas liito ma ihiye
Hanti nimaan laheynoo
Hafraanaya ma ihiye
Waxaan ahay nin hanadoo
Fulinaaya hawshee
Ma ii hagar baxdaa

Qalanjada:

Halacoow guddoon hadalkaad tidhee
Kuu hagar baxee anigana i hoo

Anba hoorri liitiyo
Hanas kuguma sheeginee
Kuwa loo hanweynyahay
Adigaw horreeyee
Waan ku helinaayoo
Taloow wa u hubsiinee
Ma is heli karnaa

Arbaha:

Taakulo hiddoy may huri kartaa
Haaheey kalgacal ma i hibin kartaa

Hirar aanu gaadheyn
Nin u heesanaayoo
Talo waw hubsiinee
Ku hodaayo ma ihiye
Isku kay hallee baan
Hadalkii ku daystee
Ma ii hagar baxdaa

Qalanjada

Halacoo guddoon hadalkaad tidhee
Kuu hagarbaxee anigana i hoo

Halacoow asaagaa
Hingal baan ka qaatee
Mid kaloo i hooyaa
Ana waa iga haniyee
Aniguna heshiis baan
Hadalki ku daystee
Ma is heli karnaa

Arbaha:

Taakulo hiddoy ma ii huri kartaa
Haahee kalgacal ma ii hibin kartaa

Qalanjada

Halacoow gudoon hadalkaad tidhee
Kuu hagar baxee anigana i hoo

Waxa xusid mudan in riwaayaddaan markii ugu horreysay laga dhigay Shineemo Ceelgaab, oo ku taallay bartamaha Xamar. Laakiin markii laba habeen la dhigay, ee aad loo jeclaystay loo soo wareejiyay Golaha Murtida iyo Madadaalada (National Theatre.) Waxa kale oo xusid mudan in Marxuum Maxamed Ibraahim Cigaal, oo markaa ahaa Ra'isul Wasaaraha Soomaaliya, uu ka codsaday abwaanka iyo kooxdaba in ay ku soo wareejiyaan gobollada dalka oo dhan, isaga oo gaadiid iyo maalgalin kaleba u ballanqaaday.

Abwaan Maxamed Jaamac Ilka-case markii uu hal sano waddanka joogay ayuu u kicitimay Qurbaha. Ha yeeshee inta aynaan u gudo gelin safarkiisii bal aan wax ka xusno heesihii u sameeyay muddadaas gaaban ee uu Soomaaliya joogay. Dabayaaqadii 1968-dii waxa abwaanku sameeyay heesta ilaa maanta caanka ah, ee la yiraahdo *"Warsan & Weersan",* ee ay qaaddo Aamino Feer. Heestaas miraheedu waxa ay ahaayeen:

Hadbaaa walalacdaadii la ii kaa widhwidhiyoo
wanaag iyo kalgacal la igu kaa wadhyeey
walbahaaro jacaylbaa i weedhaamiyee
wajigana xishood kaa waabtayee

warsan iyo weedhsan ii soo waceey
Kuu soo waceey warsan ii soo waceey
warsan iyo weedhsan ii soo waceey

Waxa kale oo uu curiyey isla waayadaas, heesta "Wahey Waaqlaan u Baxayoo", oo uu qaado Cumar Dhuule Cali. Waxana heesta laxankeeda lahaa Halac. Waa tan miraheedii:

Wahay waaqlaan u baxayoo
Cidlaan weehaabayaa
Warkayga caruurtu warisee
Hadmaynu is weheshan doonnaa

Wahay waqtiga i sida baa
Waxyeelada iigu wacanoo
U baahday waraysigaagee
Hadmaynu is weheshan doonnaa

Wahay waanigaa wakinayoo
Intaan wiiqmay weehanaaboo
U baahday waraysigaagee
Hadmaynu is weheshan doonnaa

Muddadaas kooban, ee ku sinnayd sannadka, ayaa Abwaan Maxamed Jaamac Ilka-case sidaas farshaxankiisa suugaaneed ugu raaxaystay.

Dabayaqaadii 1968dii ayaa waxa Abwaanku uu soo aaday Berbera iyo halkii uu ku dhashay. Doorkaan siyaasad baa wedday, oo mudane Maxamed Ibraahin Cigaal ayaa u soo xilsaartay in uu Berbera uga soo ololeeyo. Haddii musharraxiisii guulaystay, halkii Abwaanka laga filayay in uu ku soo noqdo Xaruntii Dalka iyo Xamar, oo abaalmarin soo doonto, ayaa waxa Abwaanka u muuqatay in aan waddankaan wax faa'iido ah ka soo socon. Waxa uu u baqoolay Abu Dabai. Abwaanka oo halkaas ku sugan ayaa October 21, 1969kii waxa Soomaaliya ka dhashay xukun Millatari.

Abwaanka oo saadaashiisii sii rumaystay ayaa u kicitimay halkaas iyo Greece. Markab ayuu ka raacay Giriigga. Haddii ay qiyaastii labo sano meeraysteen Yurub, ayaa waxa ay ka degeen Florida, USA. Waxa ay fasax ahaan u soo gaareen Newyork. Waxa abwaanku go'aansaday in uu Maraykanka ku negaado.

Labaatan sano ayuu degganaa Maraykanka. Waxa uu ku guursaday gabar Maraykanka Madow ah. Labatankaa sano, Hal mar ayuu ka soo baxay Maraykanka oo ahayd 1982dii oo uu soo gaaray Soomaaliya. Ujeeddadu waxa ay ahayd in uu soo kaxeeyo ubad uu adeer u yahay. Taasna wax bil ka yar bay ku qaadatay, oo waxa uu ku soo laabtay Maraykanka.

Muddadaas Labaatanka iyo hodhodhowda ah, abwaanku waxba ma curin, oo waa iskaga caagganaaday suugaantii uu sumcadda ku lahaa. 1992dii, ayaa abwaanku waxa uu soo galay dalka Canada, oo Soomaali badan oo leh fannaaniin iyo suugaanyahanno kaleba ay u soo qaxeen. Halkaas ayuuna, Ilaahay ha ku nabadyeelee, ilaa hadda ku sugan yahay. Muddadaan ilaa 15ka sano ah, ayaa Abwaanka halabuurka iyo wax curintuba dib ugu soo maaxatay. Suugaanta uu curiyay waxa ka mid ah maansooyinkaan:

Abwaanka ayaa waxa uu arkay nin saaxiibbo ay ahaayeen oo tix uu hadda ka hor u sheegay, meel gole ah ka sheeganaya. Ninkii

ayay maalinkii dambe meel majlis ah isugu yimaadeen, markaasaa abwaanku waxa uu yiri:

Tujaartaba tuugtu waw dhacdaa
Ninkay telfiyaan beryuu wax tuhmaa
Tobankii xalay baan adduunkii tirshay
Waxaan tabay kaatun tawlad ah
Tiriig baan u shiday toddoba boqol ah
Wadaad tuf leh baan tadcaar u dhigay
Tusbuxuu rogay faal tusaalaha
Wuxuu ku tilmaamay ruux tol ah
Kolaan tabarrucoon isaga tago
Tu'daye wax ma ii tibaaxaa.

Waxa kale oo jirtay tix waddani ah, oo uu ummadda ku baraarujinayay. Waxa ay lahayd:

Umadyahay baraad li'i
Seexashada u bogatay
La bahawday Reer Kaaf
Goormaad baraarugi?

Boorkaysku qariseen
Goormaad ka hoos bixin?

Hadmaad talada buubtiyo
Danta baylah ka ogaan
Mase baryaad ku noolaan.

Biyahaad lulaysaan
Subag haddaad ka baadhaan
Barmiil hoostu go'an tahay
Haddaad buuxinaysaan
Intaad buraashad qaaddeen
Badda haddaad dhuraysaan
Bi'i waa dadkaygow
Riyadaadu waa been.

Tixo badan oo iskugu jira waddani, kalgacal & hogotusaaleyn kale oo arrimaha ijtimaaciga ah ku saabsan ayuu unkay intii uu Canada soo gaarey iyo wixii ka dambeeyey. Bal aynu imika dheehanno heestan oo aalaaba aroosyada laga tiriyo, oo duco,

amaan, waano iyo caqlicelin isugu jirta. Sidoo kale waxa ay ka hadlaysaa dhaqanka Soomaalida. Miraha heestu waa sidaan:

Raggu magaca guudnimo
Magta waa isaga gow.
Garkana waa ka siman yahay.
Haddana kala gol roonaa
Qaarbaa gabayga tiriya
Suugaanta gaar u ah
Murti laga guntanayaa
Gabnana waanu leennahay.

Gabogabo colaadeed
Guuyada la kala dhaco
Geesi baa maleegtee
Fulaha goobtii laga waa.

Garta laysku soo baxo
Guddida laguma wada daro
Qaar baa u gooniya
Barkayaan golaha tegin

Ifka deeqdu waa gacan
Laysaga abaal gudo
Aakhirana waa guul
Gallad Eebbe lee yahay
Ninkii gaystayow hoo
Bakhaylna waa ka garanuug.

Ninka gurrani waa belo
Dhowrsadaana waa gobol
Af garoocna laga wacan
Godoliyo hinnaasena
Bagaan calafba kuu gayn
Boqonna adiga kuma geyo
Ee baalida ha guursado.
Dumarkana tan gaariya
Baa raggu gaaf wareegaa
Goombaar nin loo waa
Waa geeridoo kale
Ruuxaanad garanayn
Iyo geeljiray ku wacan tahay

Ee nafta gocoshadeedaay
Wakhtigu kuguma geeddiyo
Dadku kuguma gaagaxo
Ubadkaagu kuma gabo
Ilaahay goob xun kuma dhigo
Ee gurigeennu yuu noqon
Midaan gibilba saarnayn

Taladeenna guudnimo
Golroonni ka ogow
Hawlaha u gaafnow
Xarragana ku gaalgaal
Qaarbaa socodka gaabshee
Geeddiga ha soo harin

Laba ninoo gudboonaa
Idinkaa midkood gaba
Midna guudka mariyee
Hayga reebin gedahay.

Martidu yaanay kaa go'in
Gacalku yaanu kaa caban
Dadku ways gargaaraa
Ha illaabin gobonimo

Dumarka goonni ka ahaw
Raggana guursi kala soco
Deriskana guhaad iyo
Yaan la oran gef bay tiri

Anna muxubba gaar ah
Jacayl gun iyo baar baxay
Geed saar ku maran yahay
Mankii guudka uga baxay
Ubax laysku soo guray
Loogu beeray goonyaha
Sagalkii guduudnaa
Iyo moodda galabeed
Kuu soo gudbinayaan
Oo kuu abaal guda
Ayaan soo gudbinayaa

Waxaan suugaanta Abwaan Maxamed Jaamac Ilkacase, oo aan halkaan lagu soo koobi karin, ku soo gunaanadaynaa, hees uu u tiriyay gobollada Puntland. Heestaan waxa ay ku timid meel xaflad ayaa waxaa laga qaadayay hees lagu amaanayo gobollada dalka. Gabar ka mid ahayd dadweynihii daawanayay heesta, ayaa waxa ay ninkii heesta qaadayay ka codsatay in uu amaanta ku daro gobolka Bari, oo ay asal ahaan ka soo jeedday. Fannaankii ayaa gabadhii ku gacan sayray, isaga oo weliba ku niyad jebiyay su'aal jeesjees ah, oo oranaysa "Bari maxay tahay?" Abwaanka, oo sheekada la socday, kana xumaaday sida fannaanku ugu jeesjeesay gabadha, oo ay is yaqaaneen, ayaa waxa uu ku dejiyay in uu u samaynayo hees iyada iyo gobolkeedu lee yahay. Heestaan oo noqotay hadiyaddii ugu weynayd ee Puntland ka hesho suugaanyahannada Soomaaliyeed, ayaa miraheedu waxa ay ahaayeen:

Boqorkii haweenkaay
Beeshii xishoodkaay
Hoygiii bidhaantaay
Baarkii da'deedaay

Inkastoon basteey ahay
Bariidadu xaq weeyee
Adigiyo barbaartii
Baargaal ku noolayd
Shukriyey ma barideen
Ari Boowe
Ari Baaye
Barinnaye
Ma barideen

Qandala oo barwaaqa ah
Bayliyo Xaafuun
Ayl iyo Bariidiyo
Iskushubanta loo bogay
Biyokulule iyo Qaw
Boosaaso iyo Karin
Dhulku barisamaadkii
Igu bi'iyay caashaqu

Xeebaha Busaadeey

Sida biijajkii Yurub
Laga ooday bahalaha
Bulshada loogu talogalay
Iyo badaha luulkiyo
Cambarkuba ka buuxaan
Kalluunkuna ku badan yahay
Baatroolna laga helay
Iyo buuro malabkiyo
Laga gurayo beeyada
Oo calan buluug ahi
Baallaha ka suranyahay
Halka kii barriinsaday
Ku illaawo baahida
Basanbaas abaariyo
Jiilaalna laga baqin

Qardhoo loo xagaa baxo
Dhul Ilaah ballaarshee
Barakeeyay Nabigii
Oo togag burqanaya
Beeraha waraabshaan
Baadkiyo caleentuna
Qariyeen bacaadkii
Bilicdooda geedaha
Dhaayuhu ku burureen
Bari tii ku dhalatee
Mudug lagu barbaarshaay

Inkastoon basteey ahay
Bariidadu xaq weeyee
Adigiyo barbaartii
Baargaal ku noolayd
Shukriyey ma barideen
Ari Boowe
Ari Baaye
Barinnaye
Ma barideen

Anigaa basteeyee
Ha bukoonin abidkaa
Adigoo badbaada ah

Baradeenna ku ekow
Marka xiga balaayada
Bogga tii ku socotiyo
Tii cago ku buubtiyo
Hadday baalal leedahay
Barbarrada lagaa mari
Ilaahay bishan dhalatiyo
Sannadkaan bilowgaa
Barkhaddiisa kugu dhowr

Gunaanad

Sidii aan hore u xusayba maansooyinka iyo riwaayadaha Abwaan Maxamed Jaamac Ilkacase, ma aha kuwo qormadaan lagu soo koobi karo. Qaarkood, oo aan ilaa hadda hayo, waa aan ku bakhiilay. Waxa ka mid ah hees abwaannadu ugu garnaqsanayaan heesaaga. Waxa Kale oo ka mid ah mid abwaanku wax ku tusaalaynayo fanaaniinta cusub; waxa ka mid ah: *"Qurux Cago ku Socotaay."* Sooyaalka noloshiisa inteeda badan & hal-abuurkiisa guudba waxa aan uga falanqoondoonnaa buugga la magacbaxay, *"Halabuur: Hordhac iyo Hooris"*, oo soo bixi doona dabayaaqada sannadka 2007, haddii Eebbe idmo.